



# Dugsiyadda Guud ee Portland La Barataaro Wixii Ku Xisaabtan Mudan Warbixinta Dugsiyadeena 2011



See inside for school upgrades in your Portland neighborhood.

**W**axaad nasiib uheshay Dugsiyadda Guud ee Portland. Iyadii oo ay ka jiraan 47.000 oo arday iyo 85 dugsi, PPS waxay udub dhexaad u tahay xaafad walba. Dugsiyadeenu waa dugsi-yadiina.

Waa kuwan maxsuulkeenii ugu dambeeyey-iyoo sida aan udoonayno in aanu usii hagaajino, xataa iyadii oo lagu jiro waqti dhaqaaluhu adagyahay.

Ujeedadeenu waxaa weeye in aan udiyaarino arday walba aqoonta iyo xirfadada uu ubaahanyahay si uu ugu najaxo noloshu. Waxaanu xooga saaraynaa wixii ku xisaabtan mudan

- ▶ Tayo sare oo hogaanka iyo baridda ah oo uu dugsi walba yeesho.
- ▶ Barnaamijyo si wanaagsan looga shaqeeyey oo ku xidhiidhsan ujeedada, islamarkaana daboolaya baahida arday walba
- ▶ Rajo sare oo ku jeeda maxsuulka – wadaaga imaanta ah in arday waliba najixi karo
- ▶ Bii'ad barasho oo aad u horumarsan tan oo ku caawin doonta arday iyo macalin walba in ay ugutaan howshooda sida ugu wanaagsan.

*Waxaa inoo muuqda maxsuul wanaagsan. Najaxa ardayda waa la saxartiray iyadii oo laga duulayo heerarka. Arday badan baa imika tubti ay ku qalin jebin lahayd haysa. Isdiiwaangelintu waa ay kordhaysaa halka ay imika qoysas badani doorteen dugsiyadeena.*

Inagii oo og in ay tahay in aan sii hagaajinaa, gaadh ahaan ardayda aan cadaanka ahayn.

Dugsiyadeena — Dugsiyadina — keligood waxba masanayn karaan. Waanu ubaahanahay, waanan mahdinaynaa, ka qayb qaadashadaada.

*Carole*  
**Carole Smith**

Madaxa Dugsiyadda Guud ee Portland

## Qiyaasta maxsuulkii 2009-10

Maxsuulkani waa qiyaas gaadh ah ee xiliga fasaladda. Waxay ku xidhiidhsanyihiin najaxa waxbarasho ee mustaqbalka ardayda.

	Boqolkiiba inta gaadhay qiyaasta	Isbedelak sanad keliya
Galaya fasalka 1aad diyaarna u ah in uu akhriska	76%	↑ *6%
Fasalka sadexaad ee dhaafay dhibcihi	46%	↑ 4%
Fasaladda todobaad ee gaadhay heerkaa qoraalka	52%	↓ -3%
Fasalka todobaad 90% ama ka wanaagsan xaadiridda	83%	↑ 1%
Fasaladda sideedaad ee ka gudbay algebra	57%	↑ 13%
Ardayda galaysa fasalka 10aad ee haya tubtii qalinjebinta	55%	↑ 4%
Heerka qalinjebinta (Ardayda cusub ee afar sano ku qaadanaya shahaadada)	55%	†NA
Heerka qalinjebinta (Tirakoobkii Nat'l Center for Education — qiyaasta sanad)	70%	↑ 2%

\*korshaysay 2007-08, wax macluumaad ah oo la uruuriyey ma jirin 2008-09

†Kooxda ODE ee sanadka kowaad.

Lagu daabacay laguna diray iyadii oo la adeegsanayo barnaamijka ViDA program iyo Premier Press. Lama adeegsan dhaqaalihii fasaladda.



## Istiraatiijiyadda Najaxa Ardayda

**W**ax wanaagsan baa ka socda deugsi walba. Walow aannu u baahannahay in aanu kordhino taa si maxsuul wanaagsan uu ugaadho arday walba. Maanta, fasaladda Dugsiyadda Guud ee Portland, aqoonyahanadu waxay adeegsanayaan nidaam cusub si ay sare ugu qaadaan barashadda.

### Barid Dhiifoon

Barida wanaagsan waa qaybta ugu muhimsan waxbarashadda ardayda. Dugsiyadda Guud ee Portland waxay qaadanayaan ta-laabo ay ku hubinayaan in ardaydu ay helaan baridda dhinacta-maysa islamarkaana qiir gelinaysa, iyadii oo ay taasi u diyaarinayso in ay gaadhaan heerkii tacliinta ee lala doonayay.

- ▶ Laga bilaabo deyrta, cadaynta horumarka ardaygu sameeyo waxaa la gudbin doonaan inta uu socdo nidaamka qiimeynta macalunka.
- ▶ Horumarka ardayda waxa uu qayb ahaan ka mid yahay dib-u-eegida shaqadda maalulaha.
- ▶ Macalin walba oo dhigta maado kuwa ubucda ah islaamarkaana ka dhex muuqda Tayo hoose oo ku jeeda Qaybaha mudnaanta ee dugsiya imika wax waydiin baa loogu dhaqaaqayaa waxaana lala galayaa heshiis maamulhiisa/heeda.

**Xaqiiqo: Waxaanu dib uhabayn ku samaynaynaa nidaamka dib-u-eegida ee macalimiinta 30 sanno jirsaday si loo tayeeyo baridda.**

### Dugsiya Sare ee Roosevelt: Maxsuulka joojinta koowaad ee macalinta

Dugsiya Sare ee Roosevelt, maamule Charlene Williams ayaa dib u eegtay gudashadda macalinka iyaddii oo adeegsanaysa halka la higsanayo ee horumarka ardayda, oo ay sal-xidheen iyagii oo wada jira. Shan macalin ayaa eegaya saaxiibadood; waxay qiimeynayaan baridda fasalka iyo qaabka casharadda si ay loo saxartiro tacliimaadka. Maxsuulka: Sanadkan ardaydu way ku wanaagsanyihiin xisaabta iyo Ingiriisidda.

*“Istiraatiijiyadihii ugu saamaynta badnaa waxa ay ka imanayeen saaxiibaday. Nidaamkeena cusub ee qiimeynta waxa uu xooga saaray najaxa ardayda.. Nidaamkan cusub waxaan iisoo gaadhaya warcelino dhab ah, dhiiran, lana adeegsan karo.”*

— Hallie Gleason, baraha cilmiga bulshadda, Dugsiya Sare ee Roosevelt

## Fasalo tayo leh oo haqabtiraya baahida dhamaan bartayaasha

Dugsiyadeenu way isbedelayaan. macalimiintu waxay xooga saarayaan gudbinta fasalo tayo sare leh, iyagii oo gaadhsii-naya caawinaad ardayda la kaca kufaya ee uu dugsiguna ku adagyahay kuwan oo in kale oo dheeri ahan diyaar u ah.

- ▶ Ardayda oo dugsiyadda waqti dheer ku jira. Imika, dugsiyaddu waxay dheereeyeen sanadka ardayda iyagii oo adeegsanaya waqtigii tababarka macaliminka si wanaagsan.
- ▶ Dhamaan ardayda fasalka sideedaad waxay fursad u helayaan aljabra qani ah – iyadii oo aysan meeshu ka marnayn siinta saacadah dugsiya sare.

**Xaqiiqo: Ardayda dugsiyadda dhexe oo qaadanaya islamarkaana ku gudbay Algebra 13 boqolkiiba degmadda oo dhan sanadkii lasoo dhaafay.**

### Jason Lee K-8: Waa u diyaar akhriska wuuna dhaafay

dibloomadda iyo shaqadda waxay bilowdeen waqti hore tagtay, dugsiya Jason Lee K-8, 100 boqol fasaladii koowaad ee soo galay waxay akhriska ku bilaabeen heerka fasalka. In badan oo ardayda Lee ah waxay ka yimaadaan qoysas sabool ah iyagii oo ay udheertahay in yihiin qoysas luqadda ingiriisida ku hadlin.

Macalimiinta xadaanada iyo khusuusiga qoraayadda dugsiya waxay adeegsadeen koox wada shaqayneed, kuwan oo barataaraya islamarkaana si joogta ah uqiimaynaya sidii ay oga caawin lahaayeen ardaydu in ay maahiriin ku noqdaan akhriska iyo qoraalka. Dugsiyadda PPs, dugsiyadu waxay hubinayaan in ay ubadku helaan xirfad akadeemiyadeed gaadh ahaan fasaladda ugu horeeya.

**Xaqiiqo: 11 dugsi sanadkan, in ka badan 90 boqolkiiba araydu waxa ay galeen fasalka koowaad xagga akhriska heerkii laga layey.**

*“Dugsiya Lee, waxaanu wadaagtaa iimaan asaasi ah oo ku jeeda in ubadkeenu dhamaantood wada najixi doonaan. Imaantaa waa ruuxda dugsiyeena.”*

— Sascha Perrins, maamulaha, Jason Lee K-8



## Waa Loo Han Weanyahay

Waxaanu ku qasbanahay in aanu siino arday walba fursad uu ku gaadho hanka uu higsanayo. iyadii oo uusan weli dugsigeenu uusan gudbin maxsuul la mid ah kan ardayda midabka duwan ee ka imanaya qoysaska saboolka ah marka la barbardhigo ardayda cadaanka ah ama kuwa dakhligoodu sareeyo.

Maanta, dugsiyadeenu waxay sare u qaadanayaan hanka ardayda. Waxaanu bixinaynaa caawinaad dheeri ah oo ku jeeda ardayda utafaxaytay sidii ay oga gudbi lahaayeen caqabadaha. Jawaabta taa waxaan ka dhigi doonaa mid muuqata. Dugsiyadu waxay wadaagayaan “Wixii shaqaynaya”.

- ▶ Maamulayaashu waxay isbarbar dhigayaan waxyaabaha ka dhasha dadaalada iyagii oo wadaagaya istiraatiijiyadda si loo helo maxsuul wanaagsan.
- ▶ Xagaagii tagay, 884 arday ayaa xaadiray dugsigii xaggaaga ee bilaashka ahaa, marka lagu daro Early Learners Academy, kuwan oo ay xagga dambe ka riixaysay Nike School Innovation Fund. Isku daygoodii waxa uu ka caawiyey ardayda in ay la qabsadaan islamarkaana ay ku sugnaadaan tubtaa tan iyo fasaladda xiga ee soo socda.

**Xaqiiqo: In ka badan 85 boqolkiiba ardaydu waxay heleen xifradka cusub oo xagga akhriska iyo qoraalka ah.**

## Astor K-8: In badan ayaa ku xidhan galka cas

Njaha ardayda ee Wuqooyiga Portland Astor Dugsiyadda K-8 oo aan maxsuul wanaagsan keenin waxaa sabab u ah macalimiinta oo hankoodu aad u waynaa tan al xidhiidha ardayda.

Xadaanadda waxaa la siiyey galka cas ee shaqadda guriag kan fasaladda sideedaad ay haystaan. Waxaa loo sheegay maalintii ugu horaysay ee dugsiga “Waxaad tahay qoraa” Macalimiintu waxay iska kaashadeen sidii ay heerka fasalka iyo casharka isugu xidhi lahaayeen. Waxay adeegsadaan qiimeyn joogta ah si ay ubarataaraan tacliintooda.

*“Waalidiinta iyo howlwadeenadda way u hanwaynyihiin ardayda, marka ay soo dhaafaan kadinka xadaanadda... waxaanu isku daynay in aanu wax walba samayno waa in aanu hubinaa in ubad waliba uu najaxay.”*

— John Walden, Maamulaha, Astor K-8

## Ka Qayb qaadashadda Qoysaska

Ka qayb qaadashadda waalidka iyo daryeelka dadka waawayni waxaa furaha najaxa ardayda. Waxaanu imika arkaynaa waalid badan oo ka qayb qaadanaya dugsiga ubadkooda iyagga oo ka caawinaya ubadkooda waxbarashadda marka ay aqalka joogaan.

## Akadeemiyadda Waalidka

Sanadkan, Dugsiyadda Guud ee Portland waxay soo bandhiyeen Akadeemiyadda Waalidka – 30 fasal oo waalidnimadda, barashadda aqalka, hogaanka waalidka, horumarinta ubadka iyo doorashadda dugsiga. Fasaladda waxaa lagu bixiyaa lacag la’aan iyadii oo aysan PPS qasab ka dhigaynin. Macluumaad dheeri ah oo la xidhiidha fasaladda fadlan booqo [www.pps.k12.or.us](http://www.pps.k12.or.us).

## Ka Qayb qaadashadda waalidka: mudnaan akadeemiyadeed

Qoysaska sida wayn oga qayb qaata waxay astaan u yihiin tayo sare oo dugsiyadda ah. Qaybaha dugsiyadda ee Academic Priority Zone, waxaanu la shaqaynaa kooxo bulshadda ah sidii ay si wanaagsan oga qayb qaadan lahaayeen qoysasku waxbarashadda ubadkooda.

## Buuga dhibcaha ee shabakadda

Madaxa Sare U qaada Aradyeey! Waalidiintu imika waxay tegi karaan shabakadda si ay u arkaan waajibaadkii aqalka, dhibcaha iyo warbixinta xaadiriitanka, iyadii oo ay adeegsanayaan barnaamijka pilot in ka badan 300 oo macalin. Dhibcuhu waxa ay noqon doonaan shabakadda dhamaan dugsiyadda dhexe iyo sare sanad dugsiiyeedka soo socda.





## Nidaam Dugsiyadda Sare oo Xoogan

**S**anad walba, ardayda ka qalinjebisa PPSwaxay ku guulaystaan deeq waxbarasho oo aad usaraysa. Waxaa laga aqbalaa kuli-yadaha ugu adage e dunida. Ama waxay galaan shaqo u baahan xirfad farsamo oo aad usaraysa.

Walow ay ku dheertahay in uusan dugsi walba oo xaafadda ah uu bixin karay fasalo tayadoodu sarayso. Heerka qalinjebinta ayaa isaguna aad u hooseeyey, gaadh ahaan ardayda midabka duwan. Dugsiyadeenu ardayda uma aysan barin si siman oo hagaagsan.

Iyadoo ay jirto talooyinka ka imanaya 10.000 oo dadka Portland ah, waxaanu wax ka bedelaynaa dugsiyadeena. Deyrtan dugsi-yadda sare waxay siin doonaan ardayda:

- ▶ Fasalo qani ah oo xoogan, sida luqadaha dunida, adabka, muusikadda iyo saacadaha kuliyadda.
- ▶ Macalimiin si aad u xoogan isugu xidhan, si looga dhigo ardayda in ay la fadlgalaan dugsiyada.
- ▶ Ikhtiyaaraad dheeri ah si loo helo shaqadda aad jeceshahay iyo daraasad horumarsan
- ▶ Awooda aad ku heli karto Xirfad farsamo oo saraysa, gaadh ahaan qaybaha suuqoodu xooganyahay.

## Barnaamijyo adag oo loo simanyahay, aqalkana udhow

Deyrtan dhamaan ardayda oo dhan waxay fursad u heli doonaan barnaamijyadda ubucda oo tayo sare leh oo ka baxa dugsiyada bulshadda ay ka tirsanyihiin: Cleveland, Franklin, Grant, Lincoln, Madison, Roosevelt or ama Wilson

Dugsiyada ma yeelan doonaan fasaladda xalawiyaadka. Ardayduse waxay la karaan: macalimiin yaqaana islamarkaana dhiiri geliya najaxooda. Ikhtiyaaro badan oo gaadhyeelida barasahdda, sida fasaladda shabakadda. Fursado badan oo xirfadadda tegida kuliyadaha iyo saacadaha kuliyadda.

Sidani waa qaabka aan usaxartiri doono sinaanta. Sidan waa tan aannu ufuri doono albaabo dhowr ah oo ku jeeda kuliyadaha iyo shaqadda. Sidan waa sida dugsi sare oo walba oo ka mid ah dugsiyadeena ay ujihaynayaan xaafadooda.

## Tag Je erson. Tag kuliyadda.

Dugsiyadda gaadhka ah – Dugsiyada sare ee Benson Polytechnic Je erson High School – Middle College for Advanced Studies and Harriet Tubman Leadership Academy for Young Women – ayaa siinaya ardayda khibrado kala duwan

Wadaynimadda aan la leenahay Portland Community College, Je erson Middle College waxay siinaysaa ardayda fursad ay ku qaataan hal sano oo saacadaha kuliyadaha ah – iyadoo ay aysan wax dhaqaale ah oga bixin – kolka ay qaadanayaan shahaadada dugsi sare

Ardaydu waxay fasalo ka qaataan karaan Je erson and PCC– Xarunta Cascade. Waxay ka qayb qaadan karaan barnaamijyadda xoogan ee Je erson sida Health Sciences/Biotechnology iyo Jefferson Dancers. Waxay ka qayb qaadan karaan ciyaaraha oo ay ku biiri karaan naadiyadda. Inta ay ku jiraan afarta sano, waxay fursad u heli doonaan hagid qof qof ah oo oga imanaysa la taliyayaasha Je erson and PCC iyo caawinaad ka imanaysa Self Enhancement Inc.


Barnaamijyadda Middle College waa kuwa najaxay marka loo eego qaybaha kale: ardaydu waxay ubadantahay in ay ka qalinjebiyaan dugsiyada sare, waxay u badantahay in ay dhamaystaan kuliyadaha marka loo eego ardayda kale.

*“Ardayda isu arkain aysan kuliyadaha dhigan doonin waxay xaqiiqsan doonaan hadii ay galaan barnaamijka Middle College. Waxaan bilaabay kuliyadda anigii oo fasalka labaad ee dugsiyada sare ku jira.”*


— Michael Nelson (below), Ardayda Je erson Class ee 2010



## 2010-11 Misaaniyada Kharaashaadka Guud (\$462 milyan)



## Maalgelinta ardaygiiba dugsiyadda Oregon (Qaabka maalgelinta gobolka ee dugsiyadda), 2007-11



## Badbaadinta dhaqaalaha, barataarka fasaladda

Sadex xili oo misaaniyadda PPS ah waxay ka timaadaa Gobolka Oregon. Walow jaritaanka gobolka ay noqotay lama dhaafaan. Sidaa awgeed waxaa jira isbedelka mudnaanta misaaniyadda gobolka. Dugsiyadda k12 imika waxay helaan in ka yar 39 boqolkiiba misaaniyadda gobolka, waxay hoos oga dhacday 45 boqolkiiba sidii ay ahayd 6 sanadood ka hor.

Dugsiyadda Guud ee Portland waxay xooga saartay kharaashaadka halka kolka la xisaabay: 75 dhururuq lagu kharash garaynayo dugsiyadda (gaadh ahaan macalimiinta iyo qalabka waxbarashadda).


Ku dhawaad inta soo harta waxay caawisaa dugsiya – sida basaska iyo illaalaynta dhismayaasha dugsiyadda.

Waxaanu si joogta ah udhinaa kharaashaadka, isku dayda haqab tirka iyo kordhinta xadidida kharashaadka si loo kordhiyo caawinaadda ardayda ee fasalka:


- ▶ Macalimiintu waxay goosteen in aan kharaashaadka noloshu la cadilii karin (COLA) labada sanno ee socota, tan oo caawinaysa in tiradda fasalka hoos loo dhigo.
- ▶ PPS waxay ku bixisaa 4 dhururuq dolarkii walba maamulka, kala badh inta ay kharash ahaan u adeegsadaan degmooyinka magaaloyinka waawayn ku yaala.
- ▶ Howlwadeenadda PPS waxay bixiyaan qayb ka mid ah caamaadka iyo gunadda macaashka, tan oo ka duwan shaqaalaha hay'adaha guud ee kale.
- ▶ Degmadu waxa ay xidhay 12 dugsi tobankii sano ee lasoo dhaafay.
- ▶ Waxaanu maaraynay kaydii, si markaa ay dugsiyadu u adeegaan sanad dhamaystiran marka ay timaado in gobolku dhaqaalaha goosto.
- ▶ Degmadu waxay isu gaysay khadadkii baska si ay u badbaadiso in ka badan 500.000 oo dhaqaalaha gaadiidka ah sanad walba.
- ▶ Waxaanu kordhinay tashiilka awooda iyadii oo adeegsigii biyaha hoos loo dhigay si loo badbaadiyo aduun lagu qiyaasay 1 Milyan oo ku bixi lahayd arimaha.

**Xaqiiqo: Heshiiska cusub ayaa dhigaya in macalimiintu aysan helin COLA sadex ka mid ah afarta sano. Maamulayaashuna ma aysan helin wax COLA ah sadexdii sano ee lasoo dhaafay.**

## Dugsiyadda Guud ee Portland waxay in yar ku bixiyeen maamulka



## Ardayda isu diiwaangelisa PPS waa ay kordhaysaa





## Codkaagu wuu tirsan yahay

**D**ugsiyadeenu waxay waajahayaan su'aal muhim ah sanadkan tan oo qaabayn doonta mustaqbalka ardaydeena iyo magaaladeena. Baro waxa ka dhacaya dugsiyadeena. La wadaag aragtidaada. Noo sheeg waxyaabaha kuugu muhimsan.

### Goobaha wada sheekaysiga ee Dugsiyadda Portland

Baro qorshaheena shanta sano si aad u habsato in dhamaan ardaydu ay gaadheen heerka barashadda ee laalayey, iyadii oo aan loo eegi isirkooda ama heerka.

Ogoow waxa aynu samaynay iyo sida mudnaanta loo kala siiyey misaan iyadeena. Nagu kordhi wixii macluumaad ah ee aad heli karto. Maalmaha iyo goobaha lagu kulmayo: [www.pps.k12.or.us](http://www.pps.k12.or.us).

### Tusidda dadwaynaha: Soo arag dugsiyadda gudahooda

Tusidda dugsiyadda ee Sabtida April 9: Sidee bay xaaladda dugsiyadu usaamaynaan barashadda? Dugsiyadeenu ma udhigmaan bulshadda ku hareeraysan?

Kala qayb qaado maamulayaasha, howlwadeenadda nadaafadda iyo qaabeeyayaasha dugsiyadda ee Portland oo dhamaantood furaya albaabadooda si loo eego xaaladda dhismaha iyo dib u qaabaynta lasoo jeediyey. Waqtiga iyo goobaha. [www.pps.k12.or.us](http://www.pps.k12.or.us).

### Eegiida arga iyo Ilkaaha oo bilaash ah

Ardaydu mudan waxa ay mudanyihiin eegida, ilkaha, aragga iyo maqalka bilaashka ah, ViDA (Vision, Dental and Audiometric Program), waa howl wadaag ah oo ay caawiyeen shirkado gooni loo leeyahay iyo ururo aan dowli ahayn. Macluumaad dheeri ah ka eeg [www.pps.k12.or.us/vida](http://www.pps.k12.or.us/vida).

**La barataaro wixii ku xisaabtan mudan, Warbixinta dugsiyadeena 2011** waxaa soo saaray PPS Community Involvement and Public Affairs Dept. ([pubinfo@pps.k12.or.us](mailto:pubinfo@pps.k12.or.us)). Dugsiyadda Guud ee Portland waa fursad shaqaaleyn iyo barasho loo simanyahay.

## Furaha

Isdiiwaangelinat Ardayda	
Dugsiyadda degmadda	42,056
Barnaamijyadda gaadhka/badiilka ah	1,661
Barnaamijyadda ku sal-xidhan beesha	1,288
Barnaamijyadda adeegyadda gaadhka ah	493
Dugsiyadda Guud	1,488
<b>Tiradda Guud</b>	<b>46,986</b>
Ardaydeena	
Afrikaanka madoow	13%
Asian/Pacific Islander	9%
Hispanic	16%
Native American	1%
Cadaan	56%
La dhinacle/kuwa kale	5%
Luqadaha lagaga hadlo	100
Bartayaasha Luqadda Ingiriiska	10%
Inat mudan qadada bilaashka ah ama la qiimaha dhimay	45%
Hella adeegyadda waxbarasho ee khaaska ah	14%
Dugsiyadda	
Hoose	27
Dugsiyadda K-8	31
Dugsiyadda Dhexe	10
Dugsiyadda Sare	15
K-12	1
6-12	1
<b>Tiradda Guud</b>	<b>85</b>
<b>Marka lagu daro:</b> Ardayda PPS waxay dhigtaan 7 barnaamij oo gaadh/badiil ah, 24 barnaamijyadda ku sal-xidhan beesha 17 barnaamijyadda khaaska ah iyo 7 kuwa caqdiga kula jira degmadda.	
Shaqaalaha	
Macalimiin	2,954
Kuwa aan macalimiinta ahayn	1,860
Maamulayaasha ruqsadda haysta	165
Kuwa aan la matalin	372
Keydk	1,077
Kuwa kale	427
<b>Tiradda Guud</b>	<b>6,855</b>

Lagu daabacay laguna diray iyadii oo la adeegsanayo barnaamijka ViDA program iyo Premier Press. Lama adeegsan dhaqaalihii fasaladda.



### Gudiga Waxbarashadda ee Dugsiyadda Guud ee Portland ee iyagu iskaa wax uqabso ku shaqeyaya:

Ka biloow bidix, Pam Knowles, board co-chair (Zone 5); Trudy Sargent board co-chair (Zone 6); Ruth Adkins (Zone 1); David Wynde (Zone 2); Bobbie Regan (Zone 3); Martín González (Zone 4); Dilafruz Williams (Zone 7); and Dina Yazdani, matalaha ardayda.

